

# Takhasuska Xirfaddaha Sare ee Gaarka

Iyadoo loo marayo hal-abuurka Guusha Ardayda, Dugsiyaddaha Sare waxay bixiyaan barnaamijyo la balaariyay si ay u buuxiyaan shaqsiga ardayga qaababka uwajaho waxbashada waxyaabaha uu xiiseeyo. Barnaamijyadan waxay ardaydu u oggolaataa in ay badeshaan qirbadda dugsiga sare iyagoo u maraya dalabyo dhowr ah oo cusub iyo dalabyo waxbarasho oo la wanaajiyay. Dalabyadan waxaa ku jira Dhibacyo Jibaaran (Dual Credit), Takhasusyada Xirfaddaha Gaarka (Specialist High Skills Majors) iyo Iskaashi Wax wada barasho.

Barnaamijyadan waxay ka caawinayaan in ay buuxiyaan baahida, xiisaha iyo kartida dhamaan ardayda, ku hanuuniya waxbarashada oo sida wanaagsan ugu diyaariya qallan-jebinta iyo wixii dhaafsiisan.

## Waa maxay Takhasuska Xirfaddaha Gaarka (SHSM)?

SHSM waa barnaamij gaar ah oo ay wasaaradda ansaxisey oo ardayda u saamaxa inay ahmiyad-saaraan waxbarashadooda qeybaha gaarka ah ee dhaqaalaha iyaga oo buuxinaya shuruuddaha ka qallan-jebinta dugsiga sare. Sidoo kale waxay ka caawisaa qallin-jebinta ka dib in ay uga gudbaan tababarada shaqo, kuliyaad, jaamacad ama goobshaqo.

Inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2012–13, barnaamijka SHSM waxaad ku qaadani kartaa qeybaha soo socda:

- Beeraha
- Dhaqanka iyo Farshaxanka
- Duuliyannamada/ Diyaarad Diyaarad samaynta
- Ganacs
- Dhismo
- Tamar
- Deegaan
- Soo saarka Cuntada
- Duur
- Caafimaadka iyo fayyo-qabka
- Waxsoo saarka Beeraha iyo Wanaajintooda
- Martigelinta iyo Dalxiiska
- Macluumaadka iyo Teknooliyada Warisgaarsiinta
- Caddaaladda, Amaanka Jaaliyadda, iyo Adeegyada Xaaladdaha Deg-degga
- Waxsoosaarka
- Macdanta
- Macaash-doonka ahayn
- Ciyaaraha
- Gaadiidka

## Manfacyada ugu Weyn ee Takhasusyada Xirfaddaha Sare ee Gaarka

Qaadashada barnaamijyada SHSM waxay ardayga ka caawisaa in:

- Habeysto waxbarashadiisa dugsiga sare in ay u waafaqdo waxyaabaha uu xiiseeyo iyo kartadiisa.
- Dhis aqoon iyo xirfaddo gaar ah.

- Kasbado dhibacyo ay geygaha machadyada waxbarashada dugsiga sare ka dib ay iciraafsan yihiin.
- Hel shahaado la ictiraafsan yahay iyo tababar mihiyada la xiriira.
- Kororso Xirfaddaha laga Maarmaanka ah iyo caadooyin shaqo oo ku diiwaangashan (Ontario Skills Passport).
- Caddey, sahmi oo dib u eeg himilooyinka shaqo oo ha gaareen go'aamo la isku hubto oo ku saabsan mustaqbalkooda.
- Dibacsanaan la'how, adiga oo leh dalabyo aad u isku badelli kara dariiqyada, haddii ay dhacdo in hadafyadooda iyo qorshahooda wax iska badello.

## Sidee baa loo aqoonsadaa Takhasusyada Xirfaddaha Sare ee Gaarka?

Ardayda sida guusha leh u dhameystira barnaamijka SHSM waxay la siinayaa:

- Shahaadada Dugsiga Sare ee Ontario iyadoo ay ku dhufsan tahay calaamad casaan ah
- Diiwaangelinta SHSM oo muujineya guushiisa/eeda
- Aqoonsi rasmi oo lagu qoraya Taranskiribtiga Ardayda Ontario.

## Halkee ayaa laga bixiyaa barnaamijyada Takhasusyada Xirfaddaha Sare ee Gaarka? Sidee baan wax badan ku oggaan karaa?

Sanad dugsiyeedka 2012–13, barnaamijyada SHSM waxaa laga bixaa dhamaan dugsiyada gobolka ku baahsan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada iskuulka bixiyo, fadlan la xirii maamulaha iskuulkaaga ama Madaxa Guusha Ardayda ee guddiga iskuulkaaga. Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan barnaamijyada SHSM iyo sida ay u shaqeeyaan waxaad ka heli kartaa [www.ontario.ca/studentssuccess](http://www.ontario.ca/studentssuccess).